

Qalabka baaritaanka dugsiga iyo daryeelka caruurta COVID-19

Nooca 2: 1 da Oktoobar 2020

Caruurta waa in laga baaraa COVID-19 maalin kasta kahor inta aysan aadin dugsiga ama xanaanada caruurta. Waalidiinta ayaa buuxin kara ayaga oo ka wakiil ah canugga.

Su`aalaha Baaritaanka (gali “X” safka ku haboon)

- Canuggaagu ma leeyahay mid kamid ah calaamadaha soo socda oo **cusub ama kasii daraaya**? Calaamaduhu waa in aysan ahayn kuwo muddo dheer soo jiray ama xiriir la leh sababo ama xaalado kale oo la ogyahay.

Qandho iyo/ama qarqaryo (heerkul gaaraya 37.8°C/100.0°F ama ka badan)	<input type="checkbox"/> Haa	<input type="checkbox"/> Maya
Qufac (ka badan sida caadiga ah haddii uu yahay qufac soo jiray) uu kamid yahay dhuun xiran (qufac sida qaylada eyga oo kale ah, samaynta qaylo foori ah marka uu neefsanayo) Aan la xiriirin sababo ama xaalado kale oo la ogyahay (sida, neefta, xasaasiyadda neefmareenka)	<input type="checkbox"/> Haa	<input type="checkbox"/> Maya
Neefsiga oo yaraada (dyspnea, neefta oo joogsata, aan awoodin in uu si dheer u neefsado, xiiqlayn taasoo kasii daran sida caadiga ah haddii ay jirto neef gaabni soo jirtay) Aan la xiriirin sababo ama xaalado kale oo la ogyahay (sida, neefta)	<input type="checkbox"/> Haa	<input type="checkbox"/> Maya
Hoos u dhaca ama luminta urinta ama dhadhanka (khalkal cusub oo dhadhanka ama urta ah) Aan xiriir la lahayn sababo ama xaalado kale oo la ogyahay (sida, burooyinka sanko, xasaasiyadaha, khalkhalada neerfaha)	<input type="checkbox"/> Haa	<input type="checkbox"/> Maya

- Canuggaagu ma leeyahay mid kamid ah calaamadaha soo socda oo **cusub ama kasii daraaya**? Calaamaduhu waa in aysan ahayn kuwo muddo dheer soo jiray ama xiriir la leh sababo ama xaalado kale oo la ogyahay.

Xanuun huguriga ah (laqidda oo xanuun badan ama laqidda oo adkaata) Aan xiriir la lahayn sababo ama xaalado kale oo la ogyahay (tusaale, dheecaanka sanko ka yimaada ee hunguriga ku dhaca, xanuunka dheecaanada dheefshiidku ay dhuunta dib usoo raacaan)	<input type="checkbox"/> Haa	<input type="checkbox"/> Maya
Sanko oo xidhan iyo/ama sanko oo socda (cabbur sanko ah iyo/ama sanko oo dheecaan fara badan ka yimaado) Aan xiriir la lahayn sababo ama xaalado kale oo la yaqaano (sida, xasaasiyadaha wakhtiyada qaar yimaada, kusoo laabashada gudaha ee laga soo laabanaayo qabow, xasaasiyadda sanko oo wakhti dheer soo jirtay aan iska baddalin laynka salka, marinada neefta oo xasaasiyad leh)	<input type="checkbox"/> Haa	<input type="checkbox"/> Maya
Madax xanuun kaasoo cusub joogtana ah, aan caadi ahayn, aan la sharixin, ama waara Aan xiriir la lahayn sababo ama xaalado kale oo la ogyahay (sida, madax xanuunka nooca kacsanaanta, goonjabka muddada dheer)	<input type="checkbox"/> Haa	<input type="checkbox"/> Maya
Lalabo, matag iyo/ama shuban Aan xiriir la lahayn sababo ama xaalado kale oo la ogyahay (sida, matagidda gaaban ee ay sababta u tahay welwelka caruurta, shaqajoojinta muddada dheer ee vestibular-ka, dhibaataada caloosha kici og, cudurrada caloosha barariya, saamaynta aan wanaagsanayn ee daawada)	<input type="checkbox"/> Haa	<input type="checkbox"/> Maya
Daal, tabar darro, murqa xanuun ama xanuun guud (dareenka guud ee caafimaad la`aanta ah, tabar la`aan, daal xad dhaaf ah, cunto xumo caruurta ah) taasoo aan caadi ahayn ama aan la sharixi karin Aan xiriir la lahayn sababo ama xaalado kale oo la ogyahay (sida, niyad jab, hurdo la`aanta, shaqo joojinta qanjirka thyroid-ka, dhiig la`aanta)	<input type="checkbox"/> Haa	<input type="checkbox"/> Maya

3. Canuggaagu ma u safray meel ka baxsan Canada 14kii maalmood ee lasoo dhaafay?
 Haa Maya
4. Canuggaaga ma loo aqoonsaday in uu xiriir dhow la yeeshay qof la caddeeyay in uu qabo COVID-19 taasoo ay xaqiijisay waaxda caafimaadka dadweynaha deegaankaaga (ama app-ka digniinta COVID haddii ay haystaan teleefoonkooda)?
 Haa Maya
5. Canuggaaga ma ku amray bixiye daryeel caafimaad oo uu kamid yahay sarkaal caafimaadka bulshada ah in la karantiilo?
 Haa Maya

Natiijooyinka Su`aalaha Baaritaanka

Haddii aad kaga jawaabtay “HAA” mid kamid ah calaamadaha kujira su`aasha 1aad:



- Canuggaagu waa in uu guriga joogaa si loo karantiilo islamarkaaba.
- La xiriir bixiyaha daryeelka caafimaadka canuggaaga si aad uga hesho talo iyo qiimayn dheeraad ah, taasoo ay kamid yihiin in canuggaagu u baahan yahay baaritaanka COVID-19 ama daaweyn kale.

Haddii aad kaga jawaabtay “HAA” kaliya mid kamid ah calaamadaha kujira su`aasha 2aad:



- Canuggaagu waa in uu guriga joogaa ilaa 24 saacadood laga bilaabo marka ay calaamaduhu bilowdaan.
- Haddii calaamaduhu kasoo raynayaan, canuggaagu waxa uu kusoo laaban karaa dugsiga/xanaanada caruurta marka ay dareemaan in ay wanaagsan yihiin si ku filan oo uu ugu laaban karo. Baaritaanka muujinaaya in uusan qabin COVID-19 looma baahna in lagu celiyo.
- Haddii calaamaduhu ay sii jiraan ama sii xumaadaan, la xiriir bixiyaha daryeelka caafimaadka canuggaaga si aad uga hesho talo iyo qiimayn dheeraad ah, taasoo ay kamid yihiin in canuggaagu u baahan yahay baaritaanka COVID-19 ama daaweyn kale.



Haddii aad kaga jawaabtay “HAA” labo ama ka badan calaamadaha kujira su`aasha 2aad:

- Canuggaagu waa in uu guriga joogaa si loo karantiilo islamarkaaba.
- La xiriir bixiyaha daryeelka caafimaadka canuggaaga si aad uga hesho talo iyo qiimayn dheeraad ah, taasoo ay kamid yihiin in canuggaagu u baahan yahay baaritaanka COVID-19 ama daaweyn kale.



Haddii aad kaga jawaabtay “HAA” su`aalaha 3, 4 ama 5:

- Canuggaagu waa in uu guriga joogaa si loo karantiilo islamarkaaba waana in la raaca talada caafimaadka dadweynaha.
- Haddii canuggaagu muujiyo calaamado, waa in aad la xiriirtaa waaxda caafimaadka dadweynaha ee deegaankaaga ama bixiyaha daryeelka caafimaadka ee canuggaaga si aad uga hesho talo dheeraad ah.



Haddii aad kaga jawaabtay “MAYA” dhammaan su`aalaha, canuggaagu waxa uu aadi karaa dugsiga.

Caafimaadka Dadweynaha ee Ontario - Dabagalka Xiriirka

Ka jawaabidda su`aalahaan waa khiyaari. Macluumaadkaan waxaa kaliya isticmaali doona saraakiisha Caafimaadka Dadweynaha si ay u daba galaan xiriirka. Dhammaan macluumaadka waxaa lagu tirtiri doonaa 28 maalmood gudahood.

Taariikhda: _____

Magaca: _____

Telefann ama limayl: _____